

Walaal halkan kaga bogo erey bixin Af Soomaaliga looga soo helay cudurka dilaaga ah ee AIDS iyo jeermiga uu ka dhasho ee HIV iyo waxyaabaha kale ee xiriirka la leh sida Condom-ka. Erey bixintan waxaa qalinka u qaatay Maxamed Maxamud Xasan (Gaani) Sidoo kale gabay uu kaga hadlayo cudurka, siduu ku fido, sida aanu ku fidin, calaamadaha lagu arko qofka cudurkasi qaba, iyo sida ay tahay in loola dhaqmo qofka cudurku asiibo iyo sida ugu habboon ee la isaga ilalin karo intaba ayuu allifey sannadkii 2000.

Afka Soomaaliga dad aan si dhab ah u fahmin ayaa ku dhaliila waa tirabadan yahay iyo af cilmi lagu baran karo maaha oo ereyada cilmiga lagama dhex heli karo maaddaama uu yahay af ay lahaayeen welina leeyihiin dad raacato ah oon la saanqaadi Karin dunida horay u socota.

Arrimahaasi waa hal bacaad lagu lisay afkeenna Hooyo waa qani laakiin aaway dadkii inta dhexgalaan oo fahmaan miiddiisa soo dhanbalan lahaa.?????!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!??????

Erey bixintu waxay ka timid kelmaddii Af ingiriiska ahayd oo Af soomaali la gudban la barbardhigay oo keliya, waana sidan hoose.

Wixii talo iyo wax taarasho ah si niyad wanaag iyo soomaalinimo ku dheehan tahay ayaan u soo dhoweynayaa. Farriimahana waxaa la iigu soo dawin karaa warqaadayaashayda kala ah: [mmhgani@yahoo.com](mailto:mmhgani@yahoo.com), [mmhgani@hotmail.com](mailto:mmhgani@hotmail.com)

English	AF Soomaali
Acquired Immunodeficiency Syndrome: <u>AIDS</u>	Haleelidda Astaamaha Difaacla'aanta: <u>HAD</u>

AIDS: HAD - Had macnaha Soomaali ahaan ay leedahay waa Geeri cudurkanina wuxuu ku dhammaadaa Geeri. Ingiriiska waa 4 xaraf laakiin Soomaaliga waa 3 xaraf keliya oo weliba macne samnaynaysa oo HAD macne af Soomaali ah ayay leedahay waa tan Soomaalidu tiraahdo ama Hali waddey ama Hadi waddey.

English	AF Soomaali
Human Immunodeficiency Virus: <u>HIV</u>	Fayraska Idleeya Difaaca Aadamiga : <u>FIDAA</u>

HIV: FIDAA: Waxay ka kooban tahay macnihii oo la soomaaliyey, marka labaadna waxay qeexaysaa inuu yahay cudurkani mid la is qaadsiiyo kolka labadaas macneba waa ku habboon yahay. Maaddaama afkeennu wax la gudban Fayras aanu lahayn uuna yahay Cudur-sababaha oon laga tegi karin sidiisa ayaan u qaadnaynaa.

CONDOM: LINGAX AMA NINGAX : Lingaxa waxaa laga sameeyaa dhud maro laga jeexay ama Mayrax laga soo diiray geed qodxeedyada sida quraca oo kale, ama geedaha aan qodaxdaba lahayn sida Qararrada. Waa la calaliyaa ilaa ay jileec awgiis ka gaarayso heer ay tifmi karto kolkaa ayaa la kala dhexgeliyaa labada shay ee la isku daboolayo si tifqaan-ka looga ilaaliyo iskaba daa daadashada'e. Suugaantu waa diiwaanka Af Soomaaliga'e si aad lingax wuxuu yahay u ogaatey bal dib u milicso kolkii ay khadro Dahir lahayd HAANTA AAD KU LULATANA LINGAX WAAD U WEYDAA.

Marka weli dhaqankeenna daaqsatada aynu dib u milicsano waxaa la oran karaa Xamil oo ah aalad loo isticmaalo wanka in looga xijaabo inoo OSLIYO idaha si aanay u rimir. Waxaan isku deyayaa marka u horreysa ee ay ii suurtagasho in aan sawir ka soo qaado wan xamlan. Si aad iila wadaagtaan meesha aan ka soo dheegtey magacyada qaar.

Windows period: ISMOOG: Waa xilliga uu qofka cudurkii sido/qabo, laakiin uusan isku ogeyn, calaamadihii waaweynaana anay ka soo if bixin, aanuna war isu hayn oo ay sahlantahay inuu cid walba qaadsiiyo, marka in loo bixiyo Ismoog ayaa igula qummanaatay.

**Mahadsanidin**

**Maxamed Maxamud Xasan ( Gaani)**  
**002525755782**